# NLRA iyo Xaqa Bannaan baxa

**Xaqa Bannaan baxa.** Farqadda 7 ee sharciga ayaa oraneysa, “Shaqaaluhu waxay xaq u yeelanayaan. . . inay galaan hawlo kale oo la wada leeyahay oo ujeedadu tahay gorgortan wadareed mise gargaar kale mise ilaalin kale.” Bannaan baxa ayaa lagu daray hawlaha wadajirka ah ee ay farqaddan u ilaalisay shaqaalaha. Farqadda 13 waxay kaloo khusaysaa xaqa bannaan baxa. Waa sidan:

*Ma jiro wax Sharcigan kujira, marka laga reebo sida si gaar ah loogu sheegay halkan, si ay u faragaliyaan mise u horjoogsadaan mise u dhimaan sinnaba xaqa bannaan baxa, mise loo saameeyo xaddidaadyo mise shahaadooyinka ah xaqaas.*

Waxaa cad marka la akhriyo labadan qodob in: sharcigu uusan kaliya dammaanad qaadin xuquuqda shaqa joojinta ee uu sidoo kale xaddidayo iyo shahaadooyinka kusaabsan ku dhaqanka xaqaas.

**Bannaan baxyada sharciga iyo kuwa aan sharciga ahayn.** Sharciga bannaan baxa waxay ku xirnaan kartaa shayga, mise ujeedada, bannaan baxa, waqtiga ay ku beegantahay, mise hab dhaqanka shaqa joojinta. Shayga, mise walxaha, bannaan baxa iyo in shaygu ay xalaal yihiin waa arrimo aan mar walba fududayn in la go'aamiyo. Arrimahan oo kale inta badan waa in ay go'aan ka gaaraan Guddiga Xiriirka Shaqada Qaranka. Cawaaqibku wuxuu noqon karaa mid aad u daran oo ku yimaada shaqaalaha bannaan baxaya iyo shaqo bixiyeyaasha lagu bannaan baxayo, ee ku lugta leh marka ay samaynayaan su'aalaha dibu soo celinta iyo lacag dibu bixinta.

**Bannaan bax shay sharci ah.** Shaqaalaha u bannaan baxa shay sharci ah waxay u kala baxaan laba qaybood: bannaan baxayaal dhaqaale iyo bannaan baxayaal ka gadoodsan caddaalad darro. Labada heerba waxay u sii socdaan shaqaale ahaan, balse bannaan baxayaasha ka gadoodsan caddaaladda darrada waxay leeyihiin xuquuq weyn oo dib loogu soo celinayo shaqadooda.

**Bannaan baxayaasha dhaqaalaha la qeexay.** Haddii shayga loo bannaan baxayo uu yahay in laga shaqo bixiyaha xoogaa tanaasulaad dhaqaale ah sida mushahar kordhin, saacado gaaban, mise xaalad shaqo oo ka sii fiican, shaqaalaha bannaan baxaya waxaa loogu yeeraa bannaan baxayaan dhaqaale. Waxay sii joogi doonaan booskooda shaqaalanimo, oo lamana ceyrin karo, balse waxaa badali kara shaqo bixiyahooda. Haddii shaqo bixiyuhu kiraystay baddalka joogtada daacadda ah kuwaas oo buuxinaya shaqooyinka bannaan baxa dhaqaalaha marka bannaan baxayaashu ay shuruud la’aan codsadaan inay ku laabtaan shaqada, markaas bannaan baxayaashy xaq uma laha dibu soo celin. Haseyeeshee, haddii bannaan baxayaashy aysan helin shaqo joogto ah oo u dhiganta, waxay xaq u leeyihiin in dib loogu yeero shaqooyinkii ay u qalmeen marka ay furmaan shaqooyinkan oo kale haddii iyaga, mise wakiilkooda gorgortanka, ay sameeyeen codsi shuruud la'aan ah dibu soo celintooda.

**Bannaan baxayaal ku dhaqma shaqada aan cadaalad ahayn ee la qeexay.** Shaqaalaha gadoodka sameeya si ay u diidaan caado shaqo oo aan cadaalad ahayn oo uu ku kacay shaqo bixiye waxaa lagu magacaabaa bannaan baxayaal hab dhaqan shaqo oo aan cadaalad ahayn. Bannaan baxayaasha noocaan ah lamana ceyrin karo si rasmi ahna looma badali karo. Marka

bannaan baxu dhammaato, bannaan baxayaasha hab dhaqanka shaqada oo aan cadaalad ahayn, ka maqan anshax-xumo daran oo dhankooda ah, waxay xaq u leeyihiin in dib loogu soo celiyo shaqadooda xataa haddii shaqaalaha loo soo kiraysto inay shaqadooda qabsadaan ay tahay in shaqada laga saaro.

Haddii Guddigu ay ogaadaan in bannaan baxayaal dhaqaale mise bannaan baxayaal hab dhaqan shaqo oo aan cadaalad ahayn kuwaasoo sameeyay oo dalbaday codsi shuruud la'aan ah in shaqo bixiyahaagu si sharci darro ah u diido dibu celinta, Guddigu wuxuu ku abaal marin karaa shaqo joojiyeyaasha sidaas ah lacag bixin celin laga bilaabo waqtigii ay ahayd in dib loo soo celiyo.

**Bannaan baxyo sharci darro oo u dhaca ujeeddo awgeed.** Bannaab baxu wuxuu noqon karaa sharci darro sababtoo ah shayga, mise ujeeddada, bannaan baxa waa sharci darro. Bannaan bax lagu taageerayo urur aan cadaalad ahayn, mise mid ku keeni kara shaqo bixiyaha inuu sameeyo dhaqan shaqo oo aan cadaalad ahayn, waxay noqon kartaa bannaan bax shay aan sharci ahayn. Tusaale, waa dhaqan shaqo oo aan cadaalad ahayn in shaqo bixiyuhu uu shaqada ka ceyriyo shaqaalaha sababo la xiriira ku fashilanka bixinta lacagaha sharciga ah ee ururka marka uusan jirin heshiis amni urur oo dhaqangal ah (Farqadda 8(a)(3)). Bannaan bax lagu khasbo shaqo bixiyaha inuu tan sameeyo waxay noqonaysaa banaan bax sharci darro ah, sidaas darteed, bannaan baxa waa sharci darro.

Intaa waxa dheer, Farqada 8(b)(4) ee sharciga ayaa mamnuucaysa bannaan baxyada qaarkood inkastoo aysan diidmooyinku sharci darro ahayn haddii siyaabo kale lagu gaaro. Tusaalaha midan ah waxay noqon kartaa bannaan bax lagu khasbo Shaqo bixiye A inuu joojiyo ganacsiga uu la leeyahay Shaqo bixiye B. Ma aha sharci darro in Shaqo bixiye A si khiyaar ah u joojiyo ganacsiga uu la leeyahay Shaqo bixiye B, sidoo kale sharci darro maaha urur inuu codsado oo kaliya inuu sidaas sameeyo. Heseyeeshee, waa sharci darro in ururka uu ku ka bannaan baxo diidmo lagu khasbayo shaqo bixiyaha inuu sameeyo. Xaalad kasta, shaqaalaha ka qaybqaata bannaan bax sharci darro ah waa laga saari karaa oo xaq uma laha in dib loo soo celiyo.

**Bannaan baxu waa sharci darro ah sabab waqtiga awgeed—Saamaynta kunturaad bannaan bax la'aan.** Bannaan bax ku xad-gudbaya heshiis aan bannaan bax ahayn sharcigu ma ilaalinayo, shaqaalaha bannaan baxayana waa la ceyrin karaa mise la edbin karaa, in bannaan baxu farayo ilaalinta nooc dhaqammo shaqo aa aan cadaalad ahayn oo shaqo bixiyuhu ku dhaqaaqay mooyaane. Waa in la ogaadaa in dhammaan diidmada shaqada aan loo tixgalin bannaan bax sidaas darteedna lagu xad gudbay qodobbada bannaan baxa diidaya. Ka dhaqaaqid sabab ah xaalado aan caadi ahayn oo khatar ku ah caafimaadka, sida nidaamka hawo-mareenka oo ka xumaaday rinjiga dukaanka, ayaa la qabtay si aan loogu xad gudbin qodobka bannaan baxa diidaya.

**Isku mid — Bannaan bax dhammaadka muddada heshiiska.** Farqadda 8(d) waxay bixisaa marka labada dhinac ay rabaan inay joojiyaan mise badalaan kunturaad jirta, waa inay u hoggaansamaan shuruudaha qaarkood. Haddii shuruudahan la buuxin waayo, bannaan baxa lagu joojinayo mise lagu badalayo kunturaadda ayaa ah sharci darro oo ka qaybqaatayaasha bannaan baxa waxay lumiyaan maqaamkooda shaqaalenimo ee shaqo bixiyaha kula jira khilaafka shaqada. Haddii bannaan bax sabab u noqda habdhaqanka shaqada ee aan cadaalad ahayn ee shaqo bixiyaha, si ay doontaba, bannaan baxa ayaa lagu sifeeyay inay yihiin bannaan bax aan

cadaalad ahayn, xaaladdoodana wax saamayn ah kuma yeelanayso inay ku fashilmaan inay raacaan nidaamka loo baahanyahay.

**Bannaan bax aan sharci ahayn anshax xumo bannaan baxayaal awgeed.** Bannaan baxayaasha ku kaca anshax xumo culus inta ay ku jiraan bannaan baxa ayaa waxa suurtagal ah in loo diido in lagu soo celiyo shaqadoodii hore. Tani waxay khusaysaa bannaan baxa dhaqaalaha iyo bannaan baxa cadaalad darrada ah labadaba. Dhaqan xumo halis ah ayaa la qabtay oo ay ku jiraan, waxyaabo kale, rabshado iyo hanjabaad xadgudub. Maxkamadda Sare ee Maraykanka ayaa xukuntay in bannaan bax "fadhi ah", marka shaqaaluhu ay si fudud u joogaan warshadda oo ay diidaan inay shaqeeyaan, sidaas darteed ka hortagga milkiilaha, ma ilaalinayo sharciga. Tusaalooyinka anshax xumada daran ee sababi karta shaqaalaha ku lugta leh inay lumiyaan xuquuqdooda dib u soo celinta waa:

- Bannaan baxayaasha waxay jir ahaan ku horgoynayaan jid gooyo dadka inay soo galaan mise ka baxaan.

- Bannaan baxayaasha oo ku hanjabaya rabshado ka dhan ah shaqaalaha aan bannaan bixin.

- Bannaan baxayaasha weeraraya wakiilada maamulka.

**Xaqa Isu imaadka.** Sidoo kale xaq u lahaanshaha isu imaadka waxay ku xirantahay xaddidaadyo iyo u qalmitaan. Sida xaqa bannaan baxa, isu imaadka waa la mamnuuci karaa sababtoo ah diidmada mise waqtiga ay ku beegan tahay, mise anshax xumada ka jirta sadarka isu imaadka. Intaa waxa dheer, Farqada 8(b)(7) waxay caddaynaysaa inay tahay dhaqan shaqo oo aan caddaalad ahayn in urur uu u soo qaato diidmo gaar ah haddii isu imaadka ay la socoto bannaan bax iyo in kale.

OGOW: Waa in la caddeeyo in dukumeentigani yahay dulmar kooban oo kaliya. Gorofeynta faahfaahsan ee sharciga kusaabsan bannaan baxa, iyo ku dhaqanka sharciga dhammaan xaaladaha dhabta ah ee ka dhalan kara shaqo joojinta, ayaa ah mid ka baxsan xadka qoraalkan. Shaqaalaha iyo shaqo bixiyeyaasha rajaynaya inay ku lug yeeshaan bannaan basa waa inay si taxadar leh u socdaan oo ku saleeyaan talobixin karti leh.